Warsidaha
# CASRI
Caddad Gaar ah | Jan-June | 2019
Caddad Gaar ah
Lix Biloodle ay soo saarto Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta & Teknolojiyada



## Soomaaliya oo dib u soo ceshatay xubinnimadii UPU

## Waxqabadka **Wasaaradda** 2017-2018

Bogagga 6aad - 27aad

## Qorshaha ***Wasaaradda*** ee 2019-2020

Bogagga 28aad - 39aad

CASRI

Warsidaha CASRI, waa Lix Biloodle, ay soo saarto Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta & Teknolojiyada

**Cinwaan:**

: Jamhuria Road, P.O. Box 66, Mogadishu – Somalia.
@ : info@mptt.gov.so
: http://www.mptt.gov.so
: facebook.com/mpttsomalia
: twitter.com.com/mpttsomalia



# Tusmada

## Waxqabadka **Wasaaradda Boostada** Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada **2017-2018**

Bogagga 6aad - 27aad

## Qorshaha ***Wasaaradda*** ee 2019-2020

Bogagga 28aad - 39aad

Hordhac
Hordhac
Hordhac
Hordhac

# Hordhac

Ku dhowaad 2 sano ayaa laga joogaa markii Xukuumadda Nabad & Nolol ay xilka la wareegtay, waxaana sidoo kale la joogaa kala-bar waqtigii waajibaadkeeda (mandate). Fursaddan waxaan kaga faa'iideysaneynaa inaan dib u qiimeyno wixii noo qabsoomay iyo waxyaabaha noo qorsheysan muddada kooban ee noo hartay.

Wasaaradda Boostadda, Isgaarsiinta iyo Tiknoolojiyadda waxa ay masuuliyad gooni ah iska saartey sidii loo dardar-gelin lahaa fulinta barnaamijka Xukuumadda uu hoggaamiyo Mudane Xasan Cali Khayre gaar ahaan qeybta waajibaadka shaqo ee sida gaarka ah loogu igmaday ee la xiriira baahinta iyo nidaaminta adeegyada boostada, isgaarsiinta iyo tiknoolojiyada ee ay ugu horreeyaan adeegsiga taleefannada, internetka iyo tiknooloojiyada oo saameyn weyn ku leh nolol-maalmeedka muwaadinka Soomaaliyeed.

Haddaba Wasaaraddu waxa ay dejisey qorshe howleed koobaya waxyaabaha mudnaanta hore leh iyo arrimaha degdegta ah ee horyaalla Wasaaradda annaga oo ka duulayna Barnaamijka xukuumadda ee Tubaha iyo Qorshaha Horumarinta Qaran.

Anaga oo qoraalkan hoose ku soo bandhigi doono waxqabadkii Wasaaradda laga soo billaabo bishii Abriil 2017 illaa Disembar 2018. Waxaan sidoo kale eegeynaa qorshaha Wasaaradda ee sanadaha 2019 iyo 2020.

Inkastoo shaqo-maalmeedku aad u badan yahay, in hal qorshe la hirgalinayana ay muddo qaadaneyso, haddana waxaan idinla wadaageynaa waxyaabihii ugu muhiimsanaa ee noo qabsoomay muddadaas 2da sano ah. Waxaan sidoo kale soo koobeynaa waxyaabaha ugu waaweyn ee noo qorsheysan 2da sano ee soo socota hadduu Alle idmo.

Dhab ahaantii, waxaan u mahadcelinayaa dhammaan intii gacan nagu siisay qabsoomidda hawlahan ka soo billow madaxda ugu sarreysa dalka illaa shaqaalaha ugu hooseeya Wasaaradda.

Mahadsanidiin––

Md. Eng. Cabdi Cashuur Xasan

Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta & Teknolojiyada

2 Sano

GUUL IYO HORUMAR JOOGTO AH

# Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta & Teknolojiyada

SOMALI POST
BOOSTADA SOOMAALIYA

NCA
National Telecommunication Authority

SONIC
Somali Network Information Center

NTI
National Telecom Institute



Maqaal

# Waxaa La Soo Gaaray Waqtigii Shacabku Guran Lahaayeen Miraha Sharciga Isgaarsiinta

W/Q: Eng. Cabdi Cashur Xasan*

Labo sano ku dhowaad ayaa laga joogaa markii xukuumad iyo wasaarad ahaanba aan xilka la wareegnay, sidoo kale sanad iyo bar ayaa laga joogaa markii uu Madaxweynuhu saxiixay Sharciga Isgaarsiinta Qaranka. Marka la eego waqtiga dheer ee sharcigan la sugayay in la ansixiyo waxaan dareemayaa in shacabku dharerarayaan waqtiga ay guran doonaan mirahii sharcigan ka dhashay.

Inkastoo dadka badankiis la socdaan in kheyraadka dalkeena ay yihiin xoolaha, beeraha, iyo badda, haddana kheyraadka hawada isgaarsiinta (spectrum) kama ahmiyad yara kuwaas hore, weliba haddii aan aragti furfuran la nimaadno waxaan gaari karnaa in aan abuurno dhaqaale ku dhisan aqoon iyo macluumaad (information & knowledge economy) oo aan uga qeybgeli karno horumarka baaxadda leh ee sida xowliga ah ku socda ee adduunku ka samayeeyey dhinaca Teknolojiyada iyo Isgaarsiinta.

Hase yeeshee, inta aynan u gudo-galin hawlaha aynu qabanay iyo kuwa qorsheysan, waxaa habboon inaan idinla wadaago sida ay ahayd xaaladda isgaarsiinta dalka iyo



kaalinta ay dawladdu ku lahayd markii aan xilka la wareegeynay, inagoo mar walba ka eegeyna saddexda xagal ee kala ah: shacabka, shirkadaha iyo dawladda.

**XAALADDA JIRTAY**

Duruufo adag ayaa ka jiray suuqa isgaarsiinta dalka, kuwaas oo caqabad ku ahaa dhammaan dhinacyada ay khuseyso ee seddexda xagalba oo aan si kooban u guudmarayno:

**Shirkadaha:** Shirkaduhu ma haysanin nidaam kala ilaaliya hirarka iyo lambarrada ay isticmaalaan, marka laga reebo inay dhexdooda ka heshiiyaan sida ay u qeybsanayaan. Maadaama shirkaduhu sameysmeen iyada oo uusan sharci jirin, shirkad weliba waxay ku khasbaneyd inay iyadu cabbirato hirka, lambarrada iyo qaabka ay u shaqeynayso, haddii lagu soo xad-gudbana inay waanwaan ka gasho.

Maqnaanshaha nidaamka iyo sharciga ayaa waxa uu caqabad ku noqdey horumarinta adeegyada iyo tartan nadiif ah oo ka hirgela suuqa isgaarsiinta dalka.

**Waa Socdaa.... Eeg Bogga 8aad**

Maqaal

W/Q: Eng. Cabdi Cashur Xasan*

# Waxaa La Soo Gaaray Waqtigii Shacabku Guran Lahaayeen Miraha Sharciga Isgaarsiinta

**Ka yimd Bogga 7aad**

**Shacabka:** Shacabku waxay ku khasbanaadeen inay sitaan 2 ama 3 taleefoonka gacanta maadaama aysan shirkadaha badankood isku xirneyn dhinaca hadalka iyo isku diridda lacagaha taleefoonka, ma jirin wax heshiis isticmaal oo ka dhexeeya shirkadaha iyo macaamiishooda taas oo nugleysay ilaalinta xuquuda macaamiisha.

Sidoo kale ma jirin cid ilaalisa bedqabka dadweynaha, iyadoo la kontoroolayo qalabka la soo dajinayo, goobaha laga surayo anteenooyinka iyo awoodda shucaaca ay sii deynayaan.

**Dawladda:** Tan iyo 2005tii waxaa lagu guuleysan waayey in la ansixiyo sharci kala haga isgaarsiinta dalka , sidoo kale waxa aanan jirin wax xog ah oo wasaaraddu ka haysay shirkadaha isgaarsiinta dalka. Ilaa tobaneeyo shirkadood ayaa sheegatay inay haystaan diiwaangelin, hirar iyo lambarro, iyadoo Wasaaradda aysan oolin xitaa hal nuqul oo rasmi ah oo shirkadahaas laga reebay, dhinaca kale dakhliga dawladda ka soo gali jiray shirkadaha wuxuu ahaa mid aad u yar oo aan ku saleysneyn halbeeg la isla ogyahay.

**GOGOL-XAAR**

Haddaba, markii aan la kulanay caqabadahan iyo kuwo kale oo ka badan, balse u badnaa duruufo la xallin karay, waxaan goosanay inaan xoogga saarno tallaabooyin gogol-xaar u noqon kara yoolka ugu dambeeya ee aan leenahay, waayo haddii aan ka billowno xal degdeg ah (quick fix) oo aan niraahno shirkadaha ha isa soo diiwaangeliyaan, lacagtaasna ha bixiyaan, ama degdeg ha iskugu xirmaan ma jireyso faa'iido mustaqbalka fog ay shacabku ka heli doonaan. Haddaba, waxaan hawlaheena u kala horreysiinay sidan:

**1. Sharciga Isgaarsiinta:** Haddii uusan jirin Sharci iyo nidaam kala haga waajibaadka iyo xuquuqaha, ma jirto hab loo hirgelin karo tallaaboyin lagu nidaaminayo suuqa isgaarsiinta, hannaan lagu hirgelin karo daryeelka xuquuqda isticmaalayaasha adeegyada shirkadaha iyo jaangoynta dakhliga looga baahan yahay in laga qaado shirkad weliba.

Waxaan beddelnay qaabkii loo mari jiray ansixinta sharciga, inagoo xoogga saarnay in la soo koobo qodobada la

**ee Bogga 9aad**

Eng Cabdi Cashur Xasan waa wasiirka Boostada, Isgaarsiinta & Teknolojiyada Soomaaliya. Wuxuu shahaadada 1aad ka qaatay Jaamacadda Ummadda, halka shahaadada 2aad uu ka qaatay Kulliyadda Sayniska & Teknolojiyada ee Jaamacadda Manchester (UK), 1988.



**Ka yimid Bogga 8aad**

isku maandhaafsanaa, ka dibna wadaxaajood ka galnay, waxaana sharciga la ansixiyay iyadoo lagu wada qanacsan yahay dawlad ahaan iyo shirkadahaba.

**2. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka:**

Sharciga Isgaarsiintu waxa uu u baahan yahay hay'ad fulisa oo nidaam ahaan u dhisan (institution). Dhammaan dalalka ay ka shaqeeyaan isgaarsiin gaar loo leeyahay waxay leeyihiin hay'ado noocan oo kale ah.

Nasiib wanaag dalkeenu maanta wuxa uu leeyahay sharci isgaarsiin iyo hay'ad isgaarsiineed oo suuqa inoo nidaamisa. Haddaba waxaan markan aan u soo jeesaneynaa in, iyadoo sharciga la raacayo, shirkadaha ka ganacsada suuqan oo isugu jira isgaarsiin iyo internet, ay bixiyaan xuquuqda ay dawladdu iyo shacabku ugu leeyihiin kheyraadka hawada ee ay adeegsadaan, iyadoo dowladdu ay diyaar u tahay in ay ka caawiso dhinaca horumarinta iyo nidaaminta, kala-xadeynta adeegyada, bixinta rukhsadaha iyo diyaarinta xeer-nidaamiyayaashii ay ku howlgeli lahaayeen ama ku soo jiidan lahaayeen maalgelin iyo taageero farsamo.

Labadii sano ee la soo dhaafay waxa aan ku howlaneyn dhismaha aasaaskii sharciyeed ee hawlahan lagu qaban lahaa, iyadoo shirkaduhuna ay sii wadeen inay si duuduub ah u bixiyaan canshuuraha. Waxaase xusid mudan, oo aan uga mahadcelinayaa shirkadaha, in dakhligii ay dawladdu ka heli jirtay shirkadaha uu kordhay 3 jibbaar sanadihii 2017-2018, marka la barbardhigo sanadkii 2016 iyo wixii ka horreeyay taas oo ku timid wadahadal iyo garowshiyo labada dhinacba ah, taasi oo qeyb weyn ka qaadatay in Wasaaraddeena maaliyaddu ku guuleysato bartilmaameedyadii ay ku heshiiyeen IMF.

Mar haddii la dhisay aasaaskii waxaa la soo gaaray waqtigii shacabka Soomaaliyeed guran lahaayeen mirihii ka dhashay sharciga. Waxaana ugu soo horreyn doona oo aad inagula xisaabtami doontaan haddii Eebbe idmo:

**1. In shirkaduhu isku xirmaan (interconnection)**

maadaama ay tahay arrin waajib ah sida uu dhigayo sharciga isgaarsiinta. Waxaa shirkadaha waqti loo siinayaa inay ka heshiiyaan qiimaha iyo adeegyada iyo habka isku-xiranka, iyadoo haddii ay heshiin waayaan ay soo dhexgeli doonto dawladda si waafaqsan Xeerka Isgaarsiinta dalka.

**ee Bogga 10aad**

**Maqaal**

W/Q: Eng. Cabdi Cashur Xasan*

## *Waxaa La Soo Gaaray Waqtigii Shacabku Guran Lahaayeen Miraha Sharciga Isgaarsiinta*

Waxqabadka Wasaaradda ee 2017-2018

**Ka yimid Bogga 9aad**

**2. Dawladda Soomaaliyeed** waxay qorsheyneysaa inay aad sare ugu qaado dakhliga ka soo gala adeegyada isgaarsiinta iyo teknolojiyada

**3. In la helo daryeel sugan** oo ay helaan macaamiisha iyo isticmaalayaasha adeegyada isgaarsiinta dalka iyo hannaan lagu xalliyo cabashooyinka macaamiisha.

**NOOCYADA CANSHUURAHA IYO KHIDMOOYINKA**

Sidaan hore u soo sheegnay shirkadaha isgaarsiintu waxay bixin jireen lacag duuduub ah oo aan caddaalad u ahayn dawladda, shacabka iyo shirkadahaba maadaama aysan ku dhisneyn halbeeg la wada ogyahay.

Noocyada Canshuuraha iyo khidmadaha caadiyan la qaado:

- **Rukhsadda lagu shaqeeyo** (License to operate) oo billowga ah. Dhammaan shirkadaha isgaarsiinta waxaa laga doonayaa inay qaataan rukhsad maadaama wixii hadda ka horreeyay uusan jirin sharci.

Rukhsadda ay qaadanayaan shirkadihii hore u jiray waxay aad uga jabnaan doontaa midda ay bixin doonaan shirkadaha cusub, sida uu dhigayo Sharciga Isgaarsiinta.

- **Rukhsad Sanadle a**h (annual license fee)
- **Khidmadda Isticmaalka Hirarka** (spectrum fees)
- **Khidmadda Isticmaalka Lambarka** (Numbering fees) oo laga bixinayo lambar kasta oo taleefoon.
- **Khidmadda la saaro lacagaha taleefoonnada la isugu gudbiyo** (mobile money)
- **Canshuurta la saaro hadalka** (VAT)
- **Qaaraanka Sanduuqa Baahinta Isgaarsiinta** (Universal Service Fees) oo ah khidmad shirkadaha laga qaado si adeegga isgaarsiinta iyo internetka loogu horumariyo
- **Khidmadda Keenista Qalabka** (Type Approval fees)
- **Khidmadaha la saaro wicitaannada caalamiga ah ee dalka soo gala** (Incoming international traffic fees)
- **Khidmadaha horumarinta iyo cilmi-baarisyada qeybaha isgaarsiinta iyo Teknolojiyada** (Fees for R&D)

Khidmadahan iyo canshuuraha oo nagala dhexeeya Wasaaradda Maaliyadda hal mar ma wada billaaban doonaan ee waxaa loo kala hormarin doonaa sida ay u kala muhiimsan yihiin ee suurtogalka ah, iyadoo loo sameynayo nidaam daahfuran oo lacagaha loogu shubayo Khasnadda Dawladda ee Bankiga Dhexe oo waafaqsan qorshaha hal khasnad ee xukuumadda iyo nidaamka canshuuraha dalka.

Balse waxaa lama huraan ah in ay hirgelaan kuwa ugu muhiimsan canshuurahani ka hor dhamaadka sannadkan 2019, loona diyaariyo hab-raacyadii iyo ansixinnada lagama-maarmaanka ah ee ay u baahan yihiin.

**Eeg Bogga 11aad**

# Maqaal

W/Q: Eng. Cabdi Cashur Xasan*

## *Waxaa La Soo Gaaray Waqtigii Shacabku Guran Lahaayeen Miraha Sharciga Isgaarsiinta*

Waxqabadka Wasaaradda ee 2017-2018

**Ka yimid Bogga 10aad**

**WADAR FAA'IIDO**

Qorshaha noocan ah oo Wasaaraddu la wadaagtay xafiisyada ugu sarreeya dalka, isla markaana u soo bandhigtay shirkadaha tan iyo bishii Agoosto 2018, waxaa looga gol leeyahay inuu noqdo wax ay ka wada faa'iidaan seddexda xagalba (winwin).

**Shirkadaha:** waxa ay bixin doonaan xuquuqda uu dalku ku leeyahay maadaama ay adeegsanayaan kheyraadka hawada oo uu Soomaali kasta wax ku leeyahay.

Waxaa xusid mudan in shirkaduhu ka faa'iidayaan nidaamka cusub maadaama ay heli doonaan dakhli aan haddaba soo gelin iyo adeeg kale oo sare u qaadi doona tayada adeegyada ay bixiyaan, shirkaduhu marka ay bixiyaan xuquuqdooda waxa ay helayaan dammaanad-qaad la xiriira rukhsadaha iyo hirarka ay isticmaalaan, taasoo qiimaha shirkadahooda wax weyn ku kordhin doonta.

**Dawladda:** Dakhliga Dawladda ka soo gala isgaarsiinta waxa uu qeyb weyn ka noqon doonaa miisaaniyadda dawladda, iyada oo qeybo badan oo dakhligaas ahna ummadda loogu beddelayo waxbarasho, caafimaad, jidad iyo baahinta isgaarsiinta iyo internetka si ay u kabaan dhaqaalaha. Waxaa sidoo kale la marsiin doonaa nidaamka lagu qeybsado kheyraadka si dawlad-goboleedyaduna uga helaan xuquuqda ay arrintaan ku leeyihiin, iyadoo arrintaasi ay Wasaaraddu uga dambeyn doonto hay'adaha shaqada ku leh.

**Shacabka:** Shacabku waxay helayaan isgaarsiin isku furan oo ay ku kala dooran karaan adeegyadooda, waxayna helayaan daryeel sugan oo la xiriira xuquuqdooda isticmaal.

Waxa ayna sidoo kale helayaan in canshuurta iyo khidmado ku filan laga soo xareeyo isgaarsiinta iyo teknolojiyada, iyada oo qeybo badan oo dakhligaas ka mid ahna dib loogu celinayo isla isgaarsiinta si loo dhiso kaabayaasha oo faa'iidadeeda u dareemi karo muwaadin kasta.

Waxaan ku faraxsanahay in sanadkan la soo gaaray waqtigii laga wada faa'iideysan lahaa mirihii ka dhashay sharciga isgaarsiinta. Faa'iidooyinkaas aan soo sheegnay ee dhinac kasta ka faa'iidayo waxaa la gaari karaa marka laga wada shaqeeyo horumarka dalkan.

Ugu dambeyntii, waxaan u macadcelinayaa dhammaan madaxda sare ee qaranka, labada aqal ee baarlamaanka, Golaha Wasiirrada, guud ahaan howl-wadeennada Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Tiknolojiyada iyo dhammaan shirkadaha Isgaarsiinta dalka oo wada-shaqeyntooda kooxeed la'aanteed aysan inoo suurtogeli lahayn in aan hirgelino howshan. Dhammaanteen waxaan qeyb ka noqon doonaa taariikhda habeynta iyo horumarinta isgaarsiinta dalka.

***Dhammaad***

----------------------

# Waxqabadka Wasaaradda ee 2017-2018




## 1

## ANSIXINTA SHARCIGA ISGAARSIINTA QARANKA

WBIT Waxay ka howlgashay dardargelinta xeerka isgaarsiinta Qaranka oo loogu talogalay inuu ka shaqeeyo Horumarinta iyo nidaaminta Isgaarsiinta dalka iyo dhismaha hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo ah awoodda maamul ee isgaarsiinta qaranka.

Haddaba waxa aan qabanay kulamo wadatashiyo ah oo si gaar ah looga tashanayay dhamaystirka xeerka isgaarsiinta oo qabyo ahaa tan iyo Sanadkii 2007-dii, kulamaddaas oo ay ka soo qeybgaleen illaa 20 Shirkadood oo ka shaqeeya Isgaarsiinta, Internetka iyo Adeegyadda la xiriira, kulamadaas oo ay ugu muhiimsanayeen kuwii ka dhacay Hotel Jazeera ee Magaaladda Muqdisho 15 April 2017 iyo 21-ka May 2017.



Ugu dambeyntii Xeerka Isgaarsiinta oo ay ansxiyeen Golaha Wasiirrada iyo labada Aqal ee Baarlamaanka JFS ayaa waxaa saxiixay Madaxweynaha JFS 2dii Bisha Oktobar 2017.

# 2

## SOO-WAREEJINTA ASTAANTA INTERNETKA

ka dib dadaal dheer oo ay Wasaaraddu gashay, waxaa lagu guuleystay in Astaanta Internetka dalka (.so) lagu soo celiyo gacanta WBIT. Bishii Maarso 2018 ayuu dhacay heshiis dhex maray Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo uu Sharciga Isgaarsiinta awood u siinayo inay kor ka maamusho iyo shirkaddii dhinaca farsamada ka caawin jirtay astaanta oo la yiraahdo Cloud Registry (CR). Hase yeeshee, bishii Nofembar 2018 ayaa gebi ahaanba laga soo wareegay CR, iyadoo haatan ay SONIC 100% maamulato adeegyadeeda farsamo iyo maamulba, iyadoo isticmaaleysa barnaamijka CoCCa oo ay adeegsadaan astaamaha dalal badan oo Afrika iyo Aasiya ku yaalla.

Muddadaas ka dib waxaa la fududeeyay qaabka ay hay'adaha dawladdu ku heli karaan astaanta, iyadoo shirkadaha gudahana loo fasaxay inay noqon karaan diiwaangeliyeyaal gudaha ah (local registrars), taas oo ah markii ugu horreysay ee si furan loo dalbado.





# 3


## DHISMAHA HAY'ADDA ISGAARSIINTA QARANKA

Iyadoo la fulinayo Sharciga Isgaarsiinta Qaranka, WBIT waxay ku guuleysatay in ay yagleesho Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo ah hay'adda maamul ee Isgaarsiinta dalka taas oo iminka leh Maareye, Ku-xigeen iyo Gole Sare oo Maamul, shaqaale iyo Xafiis shaqeeya.

Hay'adda waxay si degdeg ah uga howlgashay nidaaminta Isgaarsiinta dalka, sida rukhsad bixinta iyo xeer nidaaminta adeegyada isgaarsiinta; soo jeedinta khidmadaha la xiriira maaraynta hirarka, kala-soocidda hirarka, isku-xirka shirkadaha, iwm.




FURAYAASHA ISGAARSIINTA DALKA
252
Wasaaraddu waxay mas'uul ka tahay furaha telefoonka Soomaaliya (252), waxaana la dajiyay qorshe 100% ay dawladdu ku maamuleyso
.SO
Wasaaraddu waxay mas'uul ka tahay furaha baraha internetka (.SO), waxaana lagu guuleystay in 100% ay dawladdu maamusho
SO
Wasaaraddu waxay mas'uul ka tahay furaha Boostada Soomaaliya (SO), waxaana la dajiyay qorshe 100% ay dawladdu ku hawl-gelineyso


Adeegyada Boostada Casriga
Somali Post
01
Warqadaha
Warqadaha muhiimka ah sida heshiisyada, wargeysyada, xayeysiinta, iwm
02
eCommerce
Boostadu waxay kala gudbisaa badeecadaha lagu iibsado internetka
03
Lacagaha
Boostadu waxay saldhig u noqon kartaa lacagaha xawaaladaha
04
eGovernment
Boostadu waxay xarun u noqoneysaa adeegyada dawladda ee eGov.
05
Astaan
Boostadu waa astaan ilbaxnimo iyo mid dawladeed
06
Cinwaannada
Boostadu waxay aasaas u tahay Nidaamka Cinwaannada Dalka (addressing system)



## *Xiriirka Wasaaradda iyo Qaybaha kale ee Bulshada*

*Waxaan horey u ballaqaadnay in waxqabadka wasaaradda iyo adeegyada aan ummadda u haynaba degdeg u gaarsiino bulshada, innagoo adeegsanayna qaybaha kala duwan ee warbaahinta*




*Website, Facebook iyo Twitter si joogta ah loo update-gareeyo, loo si joogto ah lagula xiriiro ulshada, looguna soo badhigo wararka ugu dambeeya ee howlaha wasaaradda iyo adeegyada Bulshada.*




*Wasaaraddu waxay si joogto ah u soo saartaa Warside lagu magacaabo CASRI oo lix biloodle ah. Waxaa lagu soo badhigaa waxqabadka wasaaradda 6dii bilood ee la soo dhaafay iyo qorshaha 6da bilood ee soo socota.*




*Wasaaraddu iyadoo ka duulaysa aragtida ah "War helaa, Talo hela" ayay howl kasta oo ay qabanayso isku howshaa inay ka diyaariso qoraalo iyo buugaag lala wadaago hadba kooxda ay khuseyso.*




*Xeer-nidaamiyeyaasha isgaarsiinta iyo teknolojiyada dalka, oo ay soo diyaarisey Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, iyadoo af Soomaali iyo Ingiriis ku qoran waxaa laga helayaa webka hay'adda, iyagoo qoranna waa la diyaariyay.*




# Waxqabadka Wasaaradda ee 2017-2018

**4**

## DEJINTA XEER-NIDAAMIYEYAAL

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo hoos tagta WBIT waxay si rasmi ah u daahfurtay hannaanka wadatashiga xeer-nidaamiyeyaasha (regulations) isgaarsiinta iyo teknolojiyada dalka, xeer-nidaamiyayaashaan oo ay soo diyaarisey Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ayaa waxa ay isugu jiraan xeer-nidaamiyeyaal iyo dokomintiyo kale oo ay ka mid yihiin Habraaca Sharciyada (Rules of Procedures) oo qeexaya sida loo soo gudbin karo talooyinka la xiriira xeer-nidaamiyeyaasha, Xeer-nidaamiyaha Lambarrada (Numbering Regulation), Xeer-nidaamiyaha Isku-xirka (Interconnection Regulation), iyo Ogeysiiska Dadweynaha ee Xeer-nidaamiyaha Isku-xirka (Public Notice), Waajibaadka iyo Qaabka ay u ekaaneysoo rukhsadda shirkadaha Isgaarsiinta (License Template - Telecom Company), Jaantuska Qoondeynta Hirarka Qaranka (National Frequency Allocation Table), iyo Tilmaamaha Fasaxa Qalabka electronic ee dalka lagu adeegsanayo (Type Approval Guidelines) oo loogu talo galay in lagu kontoroolo tayada qalabka electroniga ah ee dalka lagu adeegsanayo.

Sharciga Isgaarsiinta waa sharcigii ugu horreeyay ee taariikhda Soomaaliya ee loo sameeyo xeer-nidaamiyeyaal loogu talogalay in lagu fuliyo.

# 5

## DIB U SOO CELINTA XUBINNIMADA URURKA ISGAARSIINTA CAALAMIGA (ITU)




Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojoyada WBIT ayaa dib u soo ceshatay xubinnimadeedii Ururka Isgaarsiinta Aduunka (ITU) ka dib markii dib loo billaabay bixinta qaaraanka sanadlaha ah ee ITU iyo bixinta deyn gaareysa 2.7 milyan oo ah qaaraanka ITU oo aan la bixinin illaa 1983-kii.




Bixinta Qaaraanka Hay'adda ayaa suurtogeliyay faa'iidooyinkan:

- In shirweynaha ITU lagu ansixiyo qaraar u gaar ah Soomaaliya, kaasi oo loogu talo galay in lagu caawiyo dalkeena.
- In Soomaaliya ka qeyb gasho doorashadii hoggaanka ugu sarreeya ITU ee bishii Nofembar 2018 ka dhacday magaalada Dubai.
- In Soomaliya ay qeyb ka noqoto ansixinta qorshayaasha iyo siyaasadaha muhiimka ah ee ITU.
- In wasaaraddu billowdo ka faa'iideysiga adeegyada ITU oo markii hore xaddidnaa.

# 6

## DIB-U-HAWLGELINTA MACHADKA ISGAARSIINTA QARANKA

Waxaa dib loo howgeliyey Machadka Isgaarsiinta Qaranka oo lagu qalabeeyey agab aasaasi ah oo lagu baran doono farsamada casriga ah.

Machadka ayaa iminka diyaar u ah in uu bixiyo tababarro lagu horumariyo aqoonta shaqaalaha dowlada iyo kuwa dowlad goboleedyada.

Waxaa sidoo kale socda qorshe ballaaran oo dib loogu dhisayo dhismihii rasmiga ahaa ee Machadka.

NTI

NTI
National
Telecommunications
Institute

SOMALI POST

BOOSTADA SOOMAALIYA

# 7

# DAYACTIRKA & QALABEYNTA BOOSTADII QARANKA

WBIT waxay ka hawlgashay sidii dib loogu soo nooleyn lahaa adeeggii boostada ee dalka.

Haddaba si loo gaaro yoolkaas, WBIT waxay ku guuleysatay:

- In heshiis lala galo Boostada Jabuuti bishii Agoosto 2017 si ay marin (gateway) ugu noqoto boostadeena
- Waxaa la dayactiray dhismihii Boostada ee ku yaallay xarunta Wasaaradda.
- Waxaa la iibiyay gaadiid loogu talo galay in loogu adeego Boostada.
- Waxaa la qalabeeyay xafiisyada Boostada ee Xarunta, waxaa sidoo kale la furay xafiisyo ku yaalla garoonka iyo bartamaha magaalada.
- Waxaa la sameeyay summad (logo) u gaar ah boostada.
- Waxaa la sameeyay bar internet (posta.so) iyo baro bulsho (@PostaSomalia) oo lagala socon doono hawlaha boostada dalka.





**Wasiiru-Dowlaha Wasaaradda, Md. C/llaahi Bile Nuur**

*Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta & Teknolojiyada*

**Horumar Joogto ah**

**Warsidaha CASRI, waa 6 Biloodle, ay soo saarto Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta & Teknolojiyada**

Cadadka 1aad




Cadadka 2aad







Cadadka 3aad

# 8

## DHISMAHA KAABAYAASHA ISGAARSIINTA & TEKNOLOJIYADA

WBIT waxay ka hawl gashay sidii loo dhisi lahaa kaabayaasha isgaarsiinta iyo teknolojiyada dalka (ICT infrastructure), oo fududeyn doona sida dalkeenu uga faa'ideysto isgaarsiinta iyo teknolojiyada. Labadii sano ee la soo dhaafay waxaa suurtogalay 3 kaabe oo aad muhiim ugu ah isgaarsiinta iyo teknolojiyada dalka.

### 8.1

**Dhismaha Xarunta is weydaarsiga Internetka ee (IXP):**

Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada ayaa dhammeystirtay dhismaha Xarunta Is-weydaarsiga Internet-ka (Internet Exchange Point) ee Soomaaliya (SOIXP), taas oo fududeyn doonta in shirkadaha bixiya adeegyada internetka ay isku xirmaan, isla markaana isku weydaarsadaan xogtooda.

SOIXP
Somali Internet Exchange Point





## Waxqabadka Wasaaradda ee 2017-2018

### 8.2

**Dardargelinta Internetka Dawladda (Qaran Internet):**

Waxaa la hawlgeliyay Qaran Internet oo ah xarun siisa internet lacag la'aan ah illaa 26 ka mid ah xarumaha dawladda federaalka. Inkastoo baahidu aysan weli ku filneyn, haddana waxay xaruntan billow u tahay in wasaaradaha dawladda laga caawiyo sidii ay u heli lahaayeen adeeg internet ku xiraya adduunka.

Mashruucan oo ay soo bilaabeen masuuliyiintii naga horreysay ee wasaaradda ayaa iminka soo gabo gaboobey iyadda oo uu daahfurey Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka dalka.

### 8.3

**Xog-keydiyeyaasha DotSO:**

Waxaa markii ugu horreysay dalka lagu rakibay xog-keydiyeyaal (servers) ay leedahay Astaanta Internetka (.SO), kuwaas oo loogu talo galay in ay fududeeyaan sida baraha ku diiwaangashan .so ay si degdeg ah ugu furmi karaan.

# Waxqabadka Wasaaradda ee 2017-2018

# 9

## DARDARGELINTA MASHAARIICDA ICT

Waxaa la dardargeliyay mashaariic loogu talo galay inay ka faa'iideystaan hay'adaha federaaliga iyo kuwa dawlad-goboleedyada, waxaana ugu waaweynaa:

### 9.1

***Dhammeystirka qolalka shirarka:***
Waxaan soo dhammaystirnay 37 qolalka shirarka (communications rooms) oo loo sameeyay dowladda dhexe iyo dhammaan dowlad goboleedyada. Hawshan oo soo jiitameysay 3 sano ayaa lagu soo gabagabeeyay muddo sanad ka yar. Ujeeddada dhismayaashan ayaa ah inay hagaajiyaan xiriirka shacabka iyo dawladda maadaama qolalkaas lagu qabsan karo kulamo dadweyne.

### 9.2

***Daahfurka Xarunta Internetka iyo isku xirka Jamacaddaha dalka.***
WBIT ayaa dhammaystirtay adeegga taakuleynta Internet-ka iyo isku xirka Jaamacaddaha dalka iyo kuwa caalamka. Barnaamijkan oo loogu talogalay in kor loogu qaado tayada waxbarashada sare ee dalka ayaa waxa uu bixin doonaa Internet bilaash ah oo ay ka faa'iideysan doonaan xarumaha jaamacadaha dalka iyaga oo ku xirmaya kuwa dibadda ah si ay ugu fududaato is dhaafsiga cilmi baarista.

Xaruntan taakuleynta iyo isku Xirka internet-ka Jaamacaddaha ayaa waxa lagu hergeliyey Iskaashiga mashruuca taakuleynta Isgaarsiinta ee Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada ee uu kaalmeeyo Baanka Aduunka iyo Shabakadda SomaliREN







# 10

## ABAABULKA BAHDA ISGAARSIINTA & TEKNOLOJIYADA

WBIT waxay sare u qaadday wacyiga iyo abaabulka isgaarsiinta iyo teknolojiyada dalka. Labadii sano ee la soo dhaafay waxaa qabsoomay shirar iyo bandhigyo kala duwan oo la xiriira isgaarsiinta.




### 10.1

**Shirweyne Qaran**: Bishii May 2017 waxaan qabanay shirweynaha isgaarsiinta iyo teknolojiyada dalka oo ay ka soo qeyb galeen wasaaradaha isgaarsiinta ee dawlad-goboleedyada, shirkadaha isgaarsiinta, internetka, ururrada jaamacadaha iyo xafiisyada dawladda ee xiriirka la leh arrimaha teknolojyada.





**Shirweynaha Qaran ee Isgaarsiinta,** waxaa ka soo baxay qodobo ay ka mid ahaayeen In Wasaaraddu joogteyso kulamada noocan oo kale, In qorshaha wasaaradda ee seddexda sano ee soo socota laga tixgeliyo qiimeynta baahiyaha dhinaca tiknolojiyadda iyo isgaarsiinta dowlad goboleedyadda, In la xoojiyo wadashaqeynta wasaaradda iyo shirkaddaha isgaarsiinta, internetka iyo bahda waxbarashada, si loo horumariyo adeegyada ay bixiyaan, in adeega astaanta qaranka ee internetka Dot.SO la gaarsiiyo dhamaan hay'adaha dowladda ee federaalka iyo kuwa maamul goboleedyadda, in baahi weyn loo qabo in la meel-mariyo xeerka isgaarsiinta ee qaranka oo aasaas u noqonaya maareynta hirarka, shatiyada iwm iyo qodobo kale oo aad u muhiim ahaa.

# Waxqabadka Wasaaradda ee 2017-2018

## 10.2

**Shirar kala duwan:** Waxaan sidoo kale qabannay shirar kala duwan oo loo qabtay bahda isgaarsiinta oo hadba lagu eegayay mowduuc laga tashanayay, waxaana ka mid ahaa Shirarkii wadatashiga xeerka isgaarsiita Qaranka, Ujeeddada ugu weyn ee kulamadaa ayaa ahaa sidii uu dalku u yeelan lahaa sharci ay ka wada qeybgaleen, ra'yi iyo taloba ay ku dareen dhammaan dhinacyada kala ee uu khuseeyo sharcigan.



## 10.3

**Carwada Isgaarsiinta Qaranka:** waxay Wasaaraddu qabatay carwadii ugu horreysay ee isgaarsiinta iyo teknolojiyada dalka oo isku keentay dhammaan daneeyeyaasha isgaarsiinta oo dhan. Carwdani waxay Muqdisho ka qabsoontay 16-17kii bishii Oktoobar 2017. waxaana Carwadan daahfuray R/wasaare ku xigeenka dalka Mudane Mahdi Maxamed Guuleed, waxaana ka soo qaybgalay in ka badan 100 sirkadood oo wadni ah.





11

# SOOMAALIYA OO DIB U SOO CESHATAY XUBINNIMADEEDII URURKA MIDOWGA BOOSTADA ADDUUNKA UPU

(Bern, Switzerland – Abriil 11, 2019) Soomaaliya ayaa dib u soo ceshatay xubinnimada buuxda ee Midowga Boostada Adduunka (UPU) iyada oo la inaga qaaday xannibaad inaga saarneyd dhinaca boostada.

Munaasabad kooban oo ka dhacday Xarunta Dhexe ee UPU ee dalka Switzerland, ayna goobjoog ka ahaayeen Wasiiru-Dawlaha Wasaaradda, Md. C/laahi Bile Nuur iyo Masuuliyiinta UPU ayaa wasiirka Boostada, Md. Eng Cabdi Cashuur Xasan iyo Agaasimaha Guud ee UPU Danjire Bishaar C/raxmaan Xuseen waxa ay ku saxiixeen heshiis u oggolaanaya dalkeena in uu soo ceshto xubinnimo buuxda lagana qaado xayiraadda isla markaana ka faa'ideysan karo adeegyada UPU.

Heshiiskan ayaa u oggolaanaya Boostada dalkeena inay dalka dibeddiisa wax u diri karto, isticmaali karto dhammaan barnaamijyada UPU sidoo kalena heli karto taageerada farsamo ee ay xaqa u leeyihiin dalalka soo koraya.

Inkasta oo wada-xaajoodka arrintan ku saabsan uu soo jiimamayey muddo ku dhow hal sano, haddana khudbaddii uu wasiirku ka jeediyay kulanka Golaha Maamulka UPU iyo kulamo gooni gooni ah oo isaga iyo wafdigiisu ay la yeesheen madax kala duwan waxa ay soo dadajiyeen in lagu guuleysto soo-celinta xubinnimada, Golaha loo dhan yahay ee midawga UPU ayaa tixgelin doono mid ka mid ah labada qorshe ee ay Soomaaliya la soo shir-tagtay oo kala ah in laga wada cafiyo deynta oo dhamaystiran ama in dulsaarka laga jaro, inta soo hartana lagu bixiyo muddo 10 sano ah oo ka billaabaneysa 2019.

Agaasimaha Guud ee UPU, Bishaar Xuseen oo si gaar ah arrintan uga soo shaqeeyay ayaa sheegay inuu aad ugu faraxsan yahay inuu arko Soomaaliya oo ah xubin buuxda "Maanta laga billaabo waxa aad ku soo noqoteen Bahda UPU, waxaadna heli doontaan dhammaan xuquuqda ay leeyihiin dalalka xubnaha ka ah. Waxaan alle ka baryayaa in Soomaaliya ay soo ceshato cisigii iyo sharaftii ay ku lahayd Afrika iyo adduunkaba" ayuu yiri Danjire Bishaar oo faray dhammaan qeybaha kala duwan ee UPU inay cid walbaba kaalinta kaga aaddan ay gacan ka geysato sidii Boostada Soomaaliya dib loogu dhisi lahaa.

Wasiir Cabdi Cashuur Xasan ayaa u mahadceliyay madaxda sare ee UPU oo uu ugu horreeyo Agaasimaha guud oo fududeeyay wax badan oo la xiriira deynta iyo habka loo bixin doono.

Wasaaradda ayaa dhamaadkii 2017 ku guuleysatay dib u soo celinta xubinnimada Midowga Isgaarsiinta Adduunka (ITU) taas oo loo xayiray deymihii qaaraanka ee soo ururayay tan iyo 1983-kii.

Waxqabadka Wasaaradda ee 2017-2018

## DAYACTIRKA DHISMAHA WASAARADDA BOOSTADA

Tan iyo burburkii, dhismaha Wasaaradda Boostada & Isgaarsiinta si dhammeystiran uguma aysan shaqeyn jirin madaxda Wasaaradda iyo shaqaalaha. Tan iyo 2011 markii la isku daray wasaaradaha warfaafinta iyo boostada, madaxda Wasaaraddu waxay ku shaqeyn jireen dhismaha Wasaaradda Warfaafinta, iyadoo shaqaalaha inta kale ay ku shaqeyn jireen dhismihii rasmiga ahaa ee wasaaradda. Arrintaas ayaa keentay gaabis iyo inuu go'o xiriirkii shaqaalaha iyo madaxda.

Haddaba, madaxda Wasaaradda waxay markiiba ka hawlgaleen sidii dhammaan loogu soo wada guuri lahaa dhismaha Wasaaradda, waxaa la dejiyay qorshe guuritaan oo soo dhammaaday bishii Luulyo 2017.

Guuritaanka ka dib hawlahan ayaa laga qabtay Wasaaradda:

- In Madaxda iyo shaqaalaha ay ku wada shaqeeyaan dhismaha Wasaaradda.
- In dayactir ballaaran lagu sameeyo dhammaan qeybaha Wasaaradda, taas oo beddeshay muuqaalkii Wasaaradda.



# 13

## HABEYNTA NIDAAMKA WASAARADDA

### 13.1

**Dib-habaynta Qaab-dhismeedka Wasaaradda:**
Qaab-dhismeedka Wasaaradda kuma saleysneyn baahida shaqo ee Wasaaradda ka jirta. Tusaale ahaan 4 waaxyood ayaa ka shaqeyneysay arrimo la xiriira isgaarsiinta (isgaarsiinta, ICT, Dakhliyada, iyo Shatiyada), taas oo keentay in shirkadaha iyo shacabka ku wareeraan xiriirka Wasaaradda, maadaama ay halkii shirkad la xiriiraan 4 waaxyood oo ka tirsan Wasaaradda.

Sidaa darteed waxa aan dib u habayn ku samaynay Maamulka Wasaaradda oo aan ku soo koobney waaxyo kooban oo qaban kara si habaysan shaqada wasaaradda iyada oo loo sameeyey waax weliba tilmaamo shaqo iyo qorshe dhammaystiran oo ay ku howl gasho.

### 13.2

**Horumarinta xiriirka Wasaaradda ee wacyigelineed:**
Xiriirka Wasaaradda ee dhinaca qaababka kala duwan ee warbaahinta aad buu u hooseeyay. Si loo dhiso xiriirka Wasaaradda kala dhexeeya dadweynaha, hay'adaha iyo dalalka aan xiriirka leenahay, waxaan ku guuleysanay tallaabooyinkan hoos ku qoran:

**(1)**

**Warbixinta Wasaaradda (Profile):**
Waxaan qornay qoraal tifaftiran oo qeexaya howlaha ay Wasaaraddu u xilsaaran tahay iyo waxaayabaha ay bulshada qabato. sidoo kale warbixintu waxay qeexeysaa waaxyaha ay wasaaraddu ka kooban tahay iyo qayb kastaa shaqada ay u xilsaaran tahay.



**(2)**

**Website:**
Waxaan sameynay website ay leedahay Wasaaradda (www.mptt.gov.so) oo ay ku idil yihiin macluumaadka Wasaaradda.




**(3)**

**Warbaahinta Bulshada:**
Waxaa Wasaaradda loo sameeyay baro warbaahinta bulshada (Facebook, Twitter iyo YouTube) si macluumaadka Wasaaradda loola wadaago dadweynaha.




**(4)**

**War Saxaafadeed:**
Waxay Wasaaraddu billowday inay soo saarto war saxaafadeedyo ku qoran saddex af (Soomaali, Carabi iyo Ingiriisi) si shacabka Soomaaliyeed iyo hay'adaha iyo dalalka saaxiibka nala ahba ay ula socdaan waxyaabaha ay qabaneyso Wasaaradda.




**(5)**

**Wargeyska CASRI**: Waxay Wasaaraddu soo saartay Wargeys lix biloodle ah oo ka qeyb qaata dhinca wacyogelinta howlaha kala duwan ee wasaaraddu u xilsaaran tahay

**(6)**

**Daraasado:** Wasaaraddu waxay soo saartay daraasado ku saabsan sida ay wasaaradaha dowladdu u adeegsadaan baraha internet-ka, taasoo muujineysa heerka ay taagan yihiin wasaaradaha dawladda.



## Waxqabadka Wasaaradda ee 2017-2018

# 14

# Sahanka
# Baraha Internet-ka ee Wasaaradaha Xukuumadda

Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta & Teknolojiyada (WBIT) waxay bishii Disembar 2018 sameysay sahan kooban oo lagu ogaanayo qaabka ay u shaqeeyaan baraha (websites) ee 26ka wasaaradood ee Xukuumadda Federaalka. Ujeedka sahankan laga leeyahay waa sidii loo ogaan lahaa sida wasaaraduhu ugu baahiyaan barahooda macluumaadka Wasaaradda iyo wararkoodaba si dadweynuhu u daalacan karaan macluumaadka ay xaqa u leeyihiin..

Sahankan ayaa eegi doona dhinacyada mareegta (domain) la adeegsaday inay tahay tii rasmiga ahayd ee wasaarada (.gov.so), in naqshad (design) ay saaran tahay bogga, afafka uu boggu ku qoran yahay iyo sida xogta Wasaaradda sharraxeysa (profile) ay ugu dhammeystiran tahay.

Daraasad noocan oo kale ah waxay Wasaaraddu shaacisay bishii May 2017-kii, waxaana laga dheehan karaa in wasaaraduhu weli aysan mudnaan siinin barahooda internet-ka.

## 14.1 Baraha iyo Astaanta Dawladda:

Dhammaan wasaaradaha waxaa laga doonayaa inay adeegsanayaan bog rasmi ah oo wata astaanta qaranka (.gov.so) si ay uga duwanaadaan boggaga gaarka ah.

Daraasadda aan sameynay waxay muujineysaa in 3 ka mid ah 26ka wasaaradood aysan adeegsan .gov.so, iyadoo uu diyaar u yahay mareegtii rasmiga ahayd ee wadatay astaanta dawladda.




## 14.2 Naqshadda

Qiyaastii 81% baraha wasaaradaha waxaa saaran naqshad, inkastoo heerka tayadoodu uu kala duwan yahay. Shan wasaaradood oo u dhigma 19% ayuusan boggoodu saarneyn wax naqshad ah.




## 14.3 Xogta

Inkastoo baraha qaarkood ay u diyaarsan yihiin afafka kor ku xusan, haddana xogta baraha ku jirta ee wasaaradda qeexeysa aad bay u yar tahay, gaar ahaan markaad eegto 'Waxaan nahay', Waajibaadka Wasaaradda (Mandate), Waaxyaha, iwm.

## 14.4 Kaalinta WBIT

WBIT waxay diyaar u tahay inay wasaaradaha ka caawiso sidii ay u sameysan lahaayeen baro internet. Adeegyada aan u hayno waxaa ka mid ah in la siiyo mareeg wadata (.GOV.SO), baaxad ku filan (web hosting), iyo naqshadeyn (web designing) dhammaantood lacag la'aan ah. Waxa kaliya ee looga baahan yahay waa inay soo diraan xogta wasaaradda.

## 14.5 Afafka Bogagga

Sida uu qorayo dastuurkeenu, afka rasmiga ah ee dalkeenu waa Soomaali. Afka xiga waa Carabi. Hase yeeshee, daraasaddu waxay sheegeysaa inaan tixgelin la siinin afafka rasmiga ah sida ay u kala mudnaan leeyihiin afafka rasmiga ah. Baraha ku qoran af Soomaali waa 12 oo u dhiganta 46%, halka 1 website wasaaradeed oo kaliya uu leeyahay af Carabi (ma aha mid uu Google markaasba tarjumayo). Afka Ingiriiska ayaa ugu badan, iyadoo 18 bar internet oo u dhiganta 69% ay ku qoran yihiin af Ingiriisi.




| No | Magaca Wasaaradda | Website | Somali | English | Arabic |
|---|---|---|---|---|---|
| 1 | Boostada iyo Isgaarsiinta | mptt.gov.so | √ | √ | √ |
| 2 | Maaliyadda | mof.gov.so | √ | √ | |
| 3 | Arimaha Dastuurka | moca.gov.so | | √ | |
| 4 | Gargaarka iyo Maareynta Masiibooyinka | mohadm.gov.so | √ | √ | |
| 5 | Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada | moh.gov.so | √ | √ | |
| 6 | Warfaafinta | moi.gov.so | √ | √ | |
| 7 | Batroolka iyo Macdanta | mopmr.gov.so | | √ | |
| 8 | Arimaha Dibadda | mfa.gov.so | | √ | |
| 9 | Kalluumaysiga iyo Khayraadka Badda | mfmr.gov.so | | √ | |
| 10 | Qorshaynta, Maalgashiga & Hor. Dhaqaalaha | mop.gov.so | | √ | |
| 11 | Haweenka iyo Xuquuqda Aadanaha | mwhrd.gov.so | | √ | |
| 12 | Dhallinyarada iyo Cayaaraha | moys.gov.so | | √ | |
| 13 | Caddaaladda | moj.gov.so | | √ | |
| 14 | Duullimaadka iyo Gaadiidka Cirka | motca.gov.so | | √ | |
| 15 | Tamarta iyo Biyaha | moewr.gov.so | | √ | |
| 16 | Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guryanta | mpwr.gov.so | √ | | |
| 17 | Beeraha Iyo Waraabka | moa.gov.so | √ | | |
| 18 | Gaashaandhigga | mod.gov.so | √ | | |
| 19 | Ganacsiga iyo Warshadaha | moci.gov.so | | √ | |
| 20 | Dekedaha iyo Gaadiidka Badda | mpmt.gov.so | | √ | |
| 21 | Waxbarashada iyo Tacliinta Sare | moesomalia.net | | √ | |
| 22 | Arrimaha Diinta iyo Awqaafta | moera.so | √ | √ | |
| 23 | Shaqada iyo Arrimaha Bulshada | molgov.so | √ | | |
| 24 | Amniga Gudaha | mois.gov.so | | | |
| 25 | Arimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta | moifar.gov.so | | | |
| 26 | Xannaanada Xoolaha | mlfr.gov.so | | | |

Qorshaha

# WASAARADDA

ee 2019-2020

**Labada sano ee soo socota waxaa Wasaaradda Boostada Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada u qorsheysan hawlo badan oo lagu sii horumarinayo isgaarsiinta iyo teknolojiyada dalka. Qorshayaashaas waxaa loo kala qaadi karaa sidatan:**





Qorshaha
WASAARADDA
ee 2019-2020

# B

## ARRIMAHA ISGAARSIINTA

WBIT waxay xaqiijin doontaa fulinta Sharciga Isgaarsiinta Qaranka oo ujeedkiisu yahay inuu nidaamiyo suuqa isgaarsiinta dalka, isla markaana horseedo inuu dhaco tartan nadiif ah oo ay ka faa'iidaan dadweynaha, shirkadaha iyo dawladda.

Haddaba, si arrimahan loo suurtogeliyo, WBIT waxay qorsheyneysaa:

## B.1

### DEJINTA SIYAASADAHA ISGAARSIINTA:

WBIT waxay dajineysaa siyaasadihii lagu maamulayay isgaarsiinta dalka, kuwaas oo ay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ka diyaarin doonto xeer-nidaamiyeyaal (regulations). Siyaasadahan waa kuwo hadba u gaar ah mowduuc, sida siyaasadda hirarka, lambarrada, iwm (spectrum policy, numbering policy, etc)

Qorshaha
WASAARADDA
ee 2019-2020



## B.2

### DEJINTA DARDARGELINTA HAY'ADDA ISGAARSIINTA:

In la dardargeliyo Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo aad u da' yar, oo u baahan in lagu caawiyo inay gudato waajibkeeda.
Hay'addu waxay u xilsaaran tahay, isla markaana ku hawlan tahay, sidii xeerar nidaamiya loogu sameyn lahaa isgaarsiinta dalka, isla markaana loo fulin lahaa.



## B.3

### DEJINTA SIYAASADO LAGU DARYEELAYO DANAHA GUUD:-

WBIT waxay dajineysaa siyaasado lagu hubinayo in loo hoggaansamay Sharciga Isgaarsiinta Qaranka, isla markaana lagu ilaalinayo danaha shacabka, maalgashadayaasha, iyo dawladdaba si loo gaaro horumar loo wada dhan yahay.



Qorshaha
WASAARADDA
ee 2019-2020

B.4

## KORDHINTA DAKHLIGA DAWLADDA EE ISGAARSIINTA:-

Wasaaraddu waxay kala shaqeyneysaa Wasaaradda Maaliyadda sidii canshuurta ku waajibtay shirkadaha isgaarsiinta iyo teknolojiyada looga qaadi lahaa maadaama ay adeegsanayaan hirarka (spectrum) dalka oo ah hanti dadka oo dhan ka dhexeysa.

Xilligan ma jiro nidaam jaan go'an oo ah khidmadaha isgaarsiinta iyo teknolojiyada iyo rukshadaha adeegyada kala duwan. Haddaba waxaan dajineynaa nidaam daah furan oo la soo gelin doono baraha Wasaaradda, kaasi oo faahfaahin doona qiimayaasha khidmadaha iyo rukshadaha.

Ujeedka laga leeyahay qorshahan waxay tahay in dakhliga dawladda ka soo gala isgaarsiinta iyo teknolojiyada oo haatan ah duuduub uu noqdo wax cad oo ay wada og yihiin kan bixinaya iyo dawladdaba. Daraasado badan oo la sameeyay waxay muujinayaan in dawladdeenu dakhli badan ka sameyn karto isgaarsiinta iyo teknolojiyada si ay u awoodo inay bixiso adeegyada ay muwaadiniintu ka sugayaan.



Qorshaha
**WASAARADDA**
ee 2019-2020

# T

## ARRIMAHA TEKOLOJIYADA

Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada waxay sidoo kale dejisay qorshayaal la xiriira arrimaha teknolojiyada, kuwaas oo laga xusi karo:

# T.1

### DEJINTA SIYAASADDA QARAN EE ISGAARSIINTA IYO TIKNOLOJIYADDA DALKA (NATIONAL ICT POLICY):-

Waxay WBIT ku hawlan tahay dajinta siyaasadda qaran ee isgaarsiinta iyo teknolojiyada dalka ee 5ta sano ee soo socota (2019-2023). Siyaasaddan ayaa looga gol leeyahay inay hagto dhammaan hawlaha kala duwan ee isgaarsiinta iyo teknolojiyada dalka.



# T.2

### DIYAARINTA HAWLAHA XUKUUMAD DANABEEDKA (EGOVERNMENT) EE SOOMAALIYA:-

WBIT waxay diyaarisay qorshe lagu hirgelinayo xukuumad danabeed (electronic government) oo ujeedkiisu yahay in teknolojiyada loo adeegsado adeegyada kala duwan ee ay dawladdu siiso dadweynaha.

**SHALAY IYO MAANTA IYO MUUQAALKA WASAARADDA BOOSTADA**







Qorshaha WASAARADDA ee 2019-2020

T.3

## DHISMAHA DATA CENTER HEER QARAN:

WBIT waxay qorsheyneysaa inay dhisto xarunta keydka xogta ee qaranka (National Datacenter) oo kaabe u noqon doonta dhammaan adeegyada egovernment ee Dawladda Soomaaliya.

SHALAY IYO MAANTA IYO MUUQAALKA WASAARADDA BOOSTADA





T.4

## DIYAARINTA XARUNTA AMMAANKA INTERNETKA DALKA (CYBER SECURITY CENTRE):-

WBIT waxay diyaarisay qorshe lagu dhisayo Xarunta Ammaanka Internetka oo loogu talo galay in looga gaashaanto, isla markaana tallaabo looga qaadi karo weerarrada dhinaca internetka ee ku iman kara shirkadaha, jaamacadaha iyo hay'adaha dawladda. Waxay xaruntan sidoo kale bixin doonaa talooyin iyo wacyi-gelin la xiriirta arrimaha ammaanka internetka (internet security).

T.5

## BAAHINTA ADEEGSIGA ASTAANTA QARANKA (DOTSO):

WBIT waxay ka shaqeyneysaa sidii loo baahin lahaa adeegsiga astaanta dalka ee internetka (.so) oo loo gaarsiin lahaa dhammaan hay'adaha federaalka, dawlad-goboleedyada, iyo guud ahaan dadweynaha

# Qorshaha WASAARADDA ee 2019-2020

## J

### ARRIMAHA BOOSTADA

WBIT waxaa sidoo kale u qorsheysan inay sii dardargeliso hawlaha ay ka billowday horumarinta adeegga boostada ee dalka.

## J.1

### SOO-CELINTA XUBINNIMADII UPU:

WBIT waxay qorsheyneysaa inay soo celiso xubinnimadii Midowga Boostada Adduunka (UPU), kaas oo loo xannibay qaaraankii ururka oo aan la bixin tan iyo sanadkii 1983-kii. Xubinnimada Hay'adda waxay muhiim u tahay in Boostadeenu ay dibedda u diri karto warqado ama alaab kale.

## J.2

### BILLOWGA DIRISTA BOOSTADA DIBEDDA:

Waxaan qorsheyneynaa in sanadka 2019 uu billowdo adeeggii Boostada ee dibedda loo diri jiray, kaas oo xannibnaa tan iyo 1991-kii.

## J.3

### BAAHINTA BOOSTADA EE GOBOLLADA:

Waxaan qorsheyneynaa in adeegga boostada lagu baahiyo dalka oo dhan si shacabka Soomaaliyeed oo dhan ay uga faa'iideysan karaan.



# X

## ARRIMAHA GUUD

Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada ayaa labada sano ee soo socota qorshaynaysa inay dardargeliso dhisidda hay'adaha hoos yimaada wasaaradda.

# X.1

## DHISIDDA HAY'ADAHA HOOS TAGA WASAARADDA:-

Waxaan qorsheyneynaa in wasaaraddu xoogga saarto dhismaha hay'ado (institutions) dardargelin kara hawlaha. Marka hay'adaha la dhiso waxaa fududaaneysa shaqada Wasaaradda. Hay'adaha la dhisayo oo isugu jira kuwo cusub iyo kuwo hore u jiray oo u baahan in siyaasado iyo nidaam loo sameeyo, lana dardaregliyo, waxay kala yihiin:

- Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
- Boostada Qaranka
- Machadka Isgaarsiinta Qaranka
- SONIC – Maamulka Astaanta Internetka
- Xarunta Ammaanka Internetka

Labada sano ee soo socota waxaa hay'ad kasta loo sameyn doonaa:
- Siyaasado iyo nidaam
- Qorshaha fog (strategic plan)



## Qorshaha WASAARADDA ee 2019-2020



**Shaqaalaha WBIT oo ka qaybqaadanaya Mashruuca Isxilqaan ee dib u dhiska dalka,**

# X.2

## DIYAARINTA MASHAARIIC HORUMARINEED :-

Waxaan diyaarinay mashaariic horumarineed oo loogu talogalay in lagu horumariyo qeybaha kala duwan ee isgaarsiinta iyo teknolojiyada dalka, kuwaas oo isugu jira kuwo la diyaariyay oo la sugayo iyo kuwa la diyaarin doono labada sano ee soo socoto. Ujeedka mashaariicda waa in maalgelin loo helo horumarrada kala duwan ee ay Wasaaraddu waddo.

SOMALI POST

BOOSTADA SOOMAALIYA

## War Magaalo Warqaduu ku yaal

Adeegga Boostada waxaad ka heli kartaa kala gudbinta sida:

- ***Dokomintiyada***
- ***Badeecooyinka***
- ***Lacagaha iyo***
- ***Adeegyo kale.***



30 sano ka dib waxaa dibadda loo dirayaa Boostada Dalka

# 10 ka Waxqabad ee ugu Waaweyn WBIT

**01** Ansixinta Sharciga Isgaarsiinta

**02** Dhismaha Hay'adda Isgaarsiinta

**03** Soo-wareejinta Astaanta DotSo

**04** Dajinta Siyaasadda Qaranka ee ICT

**05** Soo-celinta xubinnimada ITU

**06** Dhismaha Xarunta isku-xirka (IXP)

**07** Diyaarinta xeer-nidamiyeyasha isgaarsiinta

**08** Tababarkii ugu horreeyay ITU ee gudaha dalka

**09** Dayactirka & qalabeynta Wasaaradda

**10** Soo-celinta xubinnimada UPU

CASRI

Warsidaha CASRI, waa Lix Biloodle,
ay soo saarto Wasaaradda Boostada,
Isgaarsiinta & Teknolojiyada

**Cinwaan:**

: **Jamhuria Road, P.O. Box 66, Mogadishu – Somalia.**
@ : **info@mptt.gov.so**
: **http://www.mptt.gov.so**
: **facebook.com/mpttsomalia**
: **twitter.com.com/mpttsomalia**